



# Dib u Dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg



69<sup>th</sup> Avenue iyo Muuqaalka Dibadda Franklin  
OH PLANNING + DESIGN, ARCHITECTURE

## Tusaale Cusub u ah Dugsiyada Dhexe

Iyadoo furayo dayrta 2021, Dugsiga Dhexe ee Kellogg wuxuu u taagnaan hiigsiga Dugsiyada Dadwaynaha Portland ee waxbarashada dugsiyada dhexe, isagoo bixinaya ikhtiyaaro iyo barnaamijyo la ballaariyey oo loogu talagalay ardayda.

Waxa lagu qaabeeyey hannaan dadwaynuhu ay si ballaaran uga qaybqaateen, goobta Kellogg waxa kamid ah 100,000 oo fuudh laba jibbaaran oo dhismaha cusub ah, oo ay kujiraan masraxa fanka masraxiyadda, goob jimicsi oo ujeedooyin badan iyo goob kulamada lagu qabto, barxad caama ah oo wayn, oo siyaabo badan loo isticmaali karo, iyo barxado waxbarasho oo dibadda ah. Dugsigu wuxuu u noqon barkulan xaafaddiisa Southeast Portland, isagoo u noqonaya xarun khayraad bulshada.



Wajahadda dugsiga

## Qodobada ugu Muhiimsan Nashqadda Kellogg

### Kafateeriyada/Meelaha Caamka ah

Kafateeriyada/meelaha caamka ah waa qalbiga dugsigan dhexe ee cusub, iyagoo u noqonaya ardayda meelo ay ku kulmaan iyo meelo hawlaha bulshadu ka qabsoomaan saacadaha dugsigu aanu shaqaynayn.

### Qolalka Waawayn ee Waxbarashada

Si sare loogu qaado wada shaqaynta fiican, kooxo fasalo ah ayaa lagu midayn doonaa dabaq kasta aag waxbarasho oo la ballaariyey

### Fanka Masraxiyadda

Masraxa fanka masraxiyadda, oo ku yaala halka ku xigta qolka muusiga, waxa loo adeegsanayaa meel waxbaris waxayna ugu furan tahay qolka jimicsiga gidaar jabaqdu ayna ka gudbin, waxaana lagu qaban masraxiyadaha, kulamada iyo dhacdooyinka kale ee bulshada.

### Khayraadka Bulshada

Nashqadda waxa kamid ah barxado samafalayaasha iyo taageerada bulshada ah, oo xaafaddu ay ka helayso isku xir.

### Xarumaha Ciyaaraha

Hoolka jimicsigu wuxuu qaadaa laba fasal oo casharrada jimicsiga ah markiiba, waxaana leeyahay daahyo kala qaybinaya. Goobta ujeedooyinka badan waxa loo isticmaali karaa hawlaha casharrada jimicsiga iyo hawlaha bulshada marka dugsigu aanu shaqaynayn.

### Shaybaarka STEAM/Beerta Waxbarashada

Shaybaarka STEAM, oo ku yaala halka ku xigta beerta waxbarashada ardayga, waxa loo isticmaali doonaa hawlaha goobta iskaashiga iyo fursadaha waxbarashada mashruuca ku salaysan. Beerta waxbarashadu waxay u ballaarisaa fasalka dibadaha laga helayo meelo loogu talagalay dhiraynta waxbarasho.

## Waqtiga Mashruucu Soconayo

### GU'GA 2017 - GU'GA 2019

#### Qorsheynta iyo Naqshadeynta

Qorsheynta Guud / Naqshadeynta  
Qaabdhismeedka / Heerarka Kala  
Gedisan Naqshada iyo Shaqada Marto /  
Dokumentiyada Dhismaha

### XAGGAAGA 2019 - XAGGAAGA 2021

#### Dhismaha

Dhismuhu wuxuu qaadan doonaa  
muddo labo sano ku dhow.

### DAYRTA 2021

#### Dib u Dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg

Iskuulku wuxuu furmayaa





Fasalka

## La Kulan Maamulaha Cusub ee Kellogg

Marka Dugsiga Dhexe ee Kellogg dib loo furo dayrta, barihii khabiirka ahaa, Richard Smith ayaa maamule ka noqon doona. Smith wuxuu maamule ka ahaa Lent K-18 School ilaa 2018. Lent markuu joogay, wuxuu la wareegay dugsi la hargan jiray wuxuuna sare u qaaday imaanshaha, dhaqanka dugsiga iyo inayna shaqaaluhu ka tagin. Smith wuxuu la wareegay shaqadiisa cusub bishii Janaayo si uu u hor kaco arrimaha badan ee ku gadaaman furitaanka dugsi cusub.



Marinada daaradaha oo leh kabadho

## Dugsiyada Ardayda ka soo Baxdaa ay Galayaan Kellogg

Sida ku cad meelaha la oggol yahay inay iska diiwaangaliyaan, barnaamijyada xaafadaha ee Arleta, Marysville, Creston iyo Lent ayaa iska baddali doona qaabka fasalada barbaarinta-ilaa-8aad (K-8) iskuna baddali doona qaabka K-5. Ardayda ku sugan fasalada 6-8 ee dugsiyadan waxay u guuri Kellogg laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2021-22. Ardayda ku jira fasalada 6-8 ee Bridger iyo Barnaamijka Maaddooyinka Qaar Isbaanishka lagu Barto ee Lent sidoo kale waxay quudin Kellogg.



Goob Jimicsi oo Cusub

**MUSTAQBALKEEDA SI WADAJIR AH U DHISAYNA.**

<http://pps.net/KelloggBond> • [KelloggBond@pps.net](mailto:KelloggBond@pps.net) • 503-916-2222

[www.facebook.com/pps.homepage/](https://www.facebook.com/pps.homepage/) [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Portland Public Schools  
School Building Improvement Bond



*Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.*